ProFiZ
**Projekt Fit in die Zukunft**
Digitale Bildung in Kitas

# Qoysaska, waalidiinta qaaliga ahoow, iyo Masuuliyiinta

Waxaan ku faraxsannahay in xarunta ilmahaagu ka qaybqaadaneyso mashruuceena *Fit in die Zukunft – Digitale Bildung in Kitas* (ProFiZ), waxaana maalgalisa BMBFSFJ.

Ujeedada mashruucu waa in lagu soo diyaariyo agabka sida maalinlaha ah looga baahanyahay wadashaqaynta ee nagala dhexaysa xirfadleyaasha waxbarashada. Ugu horayn, arintaan waxaa kamid ah fikrado cayaareed iskumid ah oo micno leh oo loogu dhisayo xirfadaha dunida dhijitaalka ah Qalabka waxaa lagu tijaabiyay marxaladda tijaabada ah (Janaayo-Maarso 2026) ee hay'adaha la xushay waxaana hadda lagu tijaabinayaa waddanka oo dhan illaa 200 oo hay'adood inta lagu jiro marxaladda ballaarinta (May 2026-Xagaaga 2027)**Maxaa ka dhacaya xanaanada ilmahaaga?**

Anaga oo wada socona xirfadleyaasha waxbarashada, waxaan fikrado ku tijaabinaa nidaamka waxbarashada maalinlaha ah. Khaasatan, waxaa la qorsheeyay waxyaabaha soo socda:

- Xirfadlahu wuxuu caruurta siinayaa ciyaaro kala duwan iyo howlo waxbarasho ah oo ku haboon da'dooda iyo korniinkooda wuxuuna si kooban u diiwaangalinayaa hanaanka dhacdooyinka asagoo qoraya si ay uga tarjunto.
- Ayagoo caawimaad ka helayna aaladda dhijitaalka ah, wax lagu qiimeeyo ee DDPR-waafaqsan ee KiDiT®, xirfadleyaasha waxay diiwaangalinayaan awoodaha ilmaha. Macluumaadkaan waxaa si qarsoodi ah loogu gudbinayaa kaliya kooxda mashruuca.

Xogta waxaa lagu kaydinayaa koodh qof walba gaar u leeyahay xanaanada ilmahaaga. Koodh u samaynta ayaa suurtagalinaysa in xogta lagu xiro xirfadlaha waxbarashada ee iska leh. Suurtagal uma ahan (xaataa kooxda mashruuca) in la garto canugga xogta leh. Daabacad kasta oo lagu sameeyo xogta waxay noqonaysaa mid guud ahaanba qarsoon.

Haddii aad aqbasho in xogtaan laga ururiyo caruurtaada ayadoo magac qarsoon ah, waxaan ku weydiinaynaa inaad buuxiso bayaanka oggolaanshaha ku lifaaqan.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan haka labalabayn inaad nala soo xiriirto.
Xushmad qaali ah,
Kooxdaada ProFiZ

Internationales
Zentrum PEP gGmbH
Alexanderufer 3-7
10117 Berlin

profiz@zentrum-pep.de
https://www.profiz-kita.de/

**Projektteam**
Prof. Dr. Catherine Walter-Laager
Dr. Jasmin Bempreiksz-Luthardt
Henrike Aden ▯ Madeline Meyer
Manja Flöter ▯ Stella-Louise Rosière

**BAYAANKA OGGOLAANSHAHA**

Waxaan halkaan ku cadaynayaa oggolaanshahayga khuseeya xanaanada carruurta

.........................................................................................................................

*(Magaca xanaanada carruurta ee ilmaha)*

Ka imaanaysa ilmahayga

……………………………………………………………………………………………………..……

*(Magaca ilmaha oo far madoow ku qoran)*

- indhaindhaynta ayuu macalinku ku duubayaa aaladda dhijitaalka ah ee KiDiT® wuxuuna u gudbinayaa International Centre PEP ayadoo magac qarsoon ah.

Xogahaan iyo waxyaabahaan la duubay waxaa taxliilin ku samaynaysa Internationale Zentrum PEP gGmbH ayadoo qayb ka ah mashruuca cilmibaarista ah ee ProFiZ, kaasoo loo isticmaalo ujeedooyin cilmibaariseed laguna daabaco magac qarsoodi ahah. Qoraalada magac qarsoodi ahah iyo natiijooyinka in si qarsoodi ah u isticmaalaysa International Centre PEP gGmbH marka la eego mashaariicda kale (cilmibaarista iyo waxbaarshada).

Ujeedadaan darteed, waxaan halkaan International Centre PEP gGmbH ugu oggolaanayaa inay xaq u leedahay inay isticmaasho. Macluumaadka waxaa lagu isticmaali karaa lacag la'aan. Nidaamka guud ee KiDiT® (www.kidit.de) wuxuu waafaqsanyahay GDPR wuxuuna ku tiirsanyahay hubinta amniga xogta asagoo qaadaya tallaabooyin adag oo ammaanka ah, sida:

- in ay ku xirto baaswaar adag (dhamaanba isticmaaleyaasha arintaan waa loo tababaray),
- fariimaha oo xiran (SSL ku xiran),
- iyo isticmaalka xogta aan tixraaca lahayn taasoo aan tixraaceeda la heli karin.

Waxaan aqbalay, qoraalkooda iyo xogta aan la tixraaci karin ee la uruuriyo loo kaydin doono si waafaqsan qodobada Sharciga Ilaalinta Xogta ee Midowga Yurub (Farqada 89 EU GDPR).

ProFiZ
Projekt Fit in die Zukunft
Digitale Bildung in Kitas

Internationales
Zentrum PEP gGmbH
Alexanderufer 3-7
10117 Berlin

profiz@zentrum-pep.de
https://www.profiz-kita.de/

**Projektteam**
Prof. Dr. Catherine Walter-Laager
Dr. Jasmin Bempreiksz-Luthardt
Henrike Aden ▯ Madeline Meyer
Manja Flöter ▯ Stella-Louise Rosière

Waxaan la socdaa macluumaadka ku saabsan ilaalinta xogta. Waxaan ka war qabaa inaan ka laaban karo oggolaanshahayga kaydinta, diyaarinta iyo isticmaalka xogta xili walba.

.......................................... ..........................................................................

*(Goobta, taariikhda)* *(Saxiixa mas'uulka(liyiinta) sharciga ah)*

Waxaad ka laaban kartaa oggolaanshahaaga diyaarinta xogta mar walba adiga oo aan sababaynin aysanna kaasoo gaarayn wax khasaaro ah. Haddii aad joojiso, waxaan tirtiri doonaa codadka laga duubay canugaaga. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan ilaalinta xogta ama aad jeceshahay inaad ka laabato oggolaanshaha ilmahaaga, fadlan nagula soo xiriir iimaylka:

profiz@zentrum-pep.de ama info@zentrum-pep.de.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ilaalinta xogta, oo ay kujirto siyaasadda xogta, waxaa laga heli karaa pep.uni-graz.at/datenschutzhinweise. Waxaad sidoo kale webseedka ku gali kartaa adigoo isticmaalaya koodhka QR-ka ee hoose:

ProFiZ
**Projekt Fit in die Zukunft**
Digitale Bildung in Kitas

Internationales
Zentrum PEP gGmbH
Alexanderufer 3-7
10117 Berlin

profiz@zentrum-pep.de
https://www.profiz-kita.de/

**Projektteam**
Prof. Dr. Catherine Walter-Laager
Dr. Jasmin Bempreiksz-Luthardt
Henrike Aden · Madeline Meyer
Manja Flöter · Stella-Louise Rosière